Haasaawe siyaasadeed ama Maqaaxida shaaha!.

Qormadii:

Sh. Axmed C/samad

2009

Haasaawe siyaasadeed (Qeybta 1aad)

Axmed C/samad
alwaqaar@hotmail.com

Dalka dadaal dheer ayaan u soo gallay, ragna waan isku haynay oo waxaa na dhexmaray loolan adag oo dhinacya badan lahaa; dhanka mabaadi'da, siyaasadda iyo waliba mid milateri oo gaar ahaan aad u muuqday laga soo bilaabo sannadkii 1992-kii. Waxaa muuqata in aan lagadnay raggii aan is haynay; waayo xagga siyaasadda kursigii (wax laga soo marayba) annagaa hadda salmuggi ugu fadhina. Xagga millatarigana dalka intii sannadahaan baratanku ka socday badankiisa annagaa gacanta ku dhignay. Xagga mabaadi'dana waa taa shacabkii na dhaafay oo uu laftayada naga dalbanayo inaan shareecada ku dhaqno, raggii aan is haynay-na waa kuwaas bisinka iyo shareecada ku wardiyaya.

Nin wariye ah oo faallo ka bixiyay hadalkii uu R/wasaare Cumar C. Rashid jeediyay ayaa tilmaamay inaanu hadalkiisa kusoo darin qodobo xiriir la leh shareecada islaamka iyo dhaqan galinteeda, taasoo ka dhigneyd in hadalkiisu uu san la socon waaqica Soomaaliya ka abuurmay. Ragga faaqida arrimaha Soomaaliyana afka kama qaadaan inaan islaamiyiinta looga maarmin talada dalka haddii la rabo in la xasiliyo.

Dhinaca xiriirka dibadda ragga aan is haynay wixii ku adkaada waxay la aadi jireen Itoobiya, wax uun xan isku qarsi ahna waa kala dhexayn jireen. Haddii aan meeshii soo galnay cidla ma aannaan taagnaan karine horta Ereteria waa keenay. Itoobiya lafteeda uga ma aannaan harine aakhirkii waa annaga ka soo dhacsanay oo odaygii 30ka sano xogta iyo xurquunkuba ka dhexeeyeen ka qaadanay, waliba nimankii Melese, Mesfin iyo Gabre ahaana la shaahaynay!.

Waxaa kaloo aan la inkiri karin in aan beeshii caalamka ee nala ku xuuxin jiray is horfariisanay oo is fahanay, iyadoon cidna nooga turjumayn. Tan kale dunidaan cidna daacad isuma ahee nin walba wuxuu ku celceliyaa hadalo uu ku nabadgali karo, xoogaana nimanka kaga qaato, dee annaguna afka ma li'ine xagjir iyo nabad-diid sheegsheegnay, in wax laga qabanayana ku dhawaaqnay. Dawladaha dariska laftooda inaan xiriir wacan la yeelanayno oo aan dalkayaga looga duulayn caddaynay, wuxuna intaasayba ahaayeen.

Guulahaas kama dambays ma yihiin?

Haddaba waxaa is weydiin leh guulahaas aynu ka soo waranay ma yihiin kama dambays mise tabcaa nala la maagan yahay?.

Waxaa jira muuqaalo tusaya in aan waxyaabahaani guulo ahayn iyo hadday yihiinba inaysan kama dambays ahayn ee dabin naloo ka tillaabsaday, waxaana ka mid ah:

1. Horta raggii aan is haynay iyagoo isku duuban ayay wax nagu darsadeen. R/wasaare Nuur Cadde wuxuu ku guulaystay inuu wixii eed ahaa oo dhan dusha u saaro madaxweyne C/laahi iyo guddoomiye Max'ed dheere kaliya, uuna la shiryimaado raggiisii oo dhan oo wada ceeb ka saliin ah!. Halka annagoo raggayagii bar iyo buro ka soo tagnay aan golihii nimid. Malaha madaxweyne Shariif asna inuu labo nin madaxfurasho ka dhigo ayay ahayd oo uu argagixisanimadoo dhan kaligood dusha u saaro, raggiisa kalena uu isku wato, inkastoo ay dhici karto inta uu ka tagay in ka yar inaysan kafaaragud noqon Karin!.

2. Raggayagii waxay u qaybsameen jabhado ragga dagaal wax kula qaybsada iyo siyaasiyiin cadkooda miiska ku goosta. Ragga aan dalka isku hayno qaybsankaan horay bay u soo mareen, walina waa la ildaran yihiin, annagase hadday noo kow tahay. Waxaase guul ah in aan iyaga waaya-argnimadoodii hayno oo aanaan xabbad hadda isku la qamaamayn.

Intaysan dhicin xukuumaddii Max'ed Siyaad ayay samaysantay kooxdii Manafesto hortoodna waxaa duurka ku jiray jabhadihii mucaaradka ahaa oo markii dambe xagga woqooyiga looga baxshay (maanaqaaxo). Labada kooxood waxay isku raacsanaayeen mucaaradada xukuumadda, waxayse isku maandhaafsanaayeen cidda talin doonta. Manafesto waxay u badnayd odayaashii siyaasiyiinta ahaa oo isu arkayey inay hoggaanka iyagu mudan yihiin. Waxaa markii dambe horjooge u noqday Cali Mahdi Max'ed.

Maanaqaaxo waxaa saldhig u ahaa saraakiil ciidan iyo rag kaloo jabhadnimada ku soo caanbaxay oo is lahaa dalka askar baa ka talisa, kaalintoodana askar kalaa buuxin karta. Waxaa intaa u dheeraa iyagoo isu arkayay inay usoo halgameen kursiga. Waxaa markii dambe iyagana horjooge u ahaa Max'ed Faarax Caydiid, malaha C/laahi Yuusuf-na waa sii dhaxlay.

Haddaba ma laga yaabaa in raggii aan dalka isku haynay doonayaan in ay isku jabiyaan awooddayada ciidan iyo awooddayada siyaasadeed maadaama aan loolankii uga adkaanay. Sidii ay horay isugu jabeen Manafesto iyo Maanaqaaxo markay guulaysteen kadib?. Mase laga yaabaa in Nuur cadde iyo saaxiibadi noo dhigeen irmaan (kataan) labo afley ah oo haddii aan isku dhammaanana ay dhib yari nagu dhaxlaan, haddii aanaan is dilina ay axdi qarameedka iyo codka baarlamaanka nagu jabiyaan?, iyagoo waliba cadaadis dibadda ahna noo kaashanaya.

3. Raggii aan is haynay markay u caddaatay inaysan sii jiri karin oo ay kala tagayaan ama isugu baaba'ayaan Manafesto iyo Maanaqaaxo ama muqaawamadu kala fiijinayso (markay intaas u caddatay) ma laga yaabaa si ay u badbaadaan inay ku tashadeen inay hal dhagax dhawr shimbirood ku wada dilaan oo ay wax noogu darsadeen: inay iyagu ku kala badbaadaan, annagana nagu kala jabiyaan, dalku inuu si buuxda gacanta noogu galana ay uga hortagayaan, haddii wax noo hirgalaana ay noola yeeshaan ama nooga carqaladayn karaan iyo inay ceebtoodii nooga xuubsiibtaan?.

4. Kolley haddii rag is hayo in booraan la isu qodo iyo in dabino qarsoon la isu dhigo intuba la yaab ma aha ee waxaa la yaab ah in nin weyn oo indhihiisu shan yihiin la dago. Tan kale haddee annaguba rag baan nahayoo xargo la'aan noqon mayno, waase ninkii siriqda ku hordhaca.

5. Dhan kale ma moodaa in annaga nala dabay oo dabinkii si dhib yar naloo ku riday marka la eego sida aan wixii la isku hayay (mabaadi'dii iyo siyaasadihii) oo dhan raggii ugu raacnay. Tusaale ahaan:

· Bisin afka ah oo ay awalba qabsan jireen ayay noogu dheeraysteen Axdigii Imbaghaati-na way nagu dhaariyeen.

· Qabyaaladdii ay waligood soo wadeena (iska daa ayadiiye) halbeegyadeedii ayaan qaadanay.

· Raggu awalba tol bay ahaayeene waxyaabaha aan farta ugu fiiqaynay waxaa ka mid ahaa xiriir hoosaadka Itoobiya, isagiina ugu yaraan inaan ula simanay baad moodaa, in kastoo aan wali nala ka maqal walaalahayo Itoobiya iyo salaam 114 Qur'aanka ah oo aan Zenaawi ka keenay midna!.

· Raggii aan is haynay, eedaha waaweyn ee ay galeen waxaa ka mid ahaa inay ciidamo shisheeye dadkii iyo dalkii ku banasyteen, annaguna wali afkaan ka dhawraynaa inaan loo baahnayn, inay nabada noo sugaan in aan hunguri ka qabnana waa suure!.

· Doonista beesha caalamka iyo la dagaalanka argagixisada ayaa iyana ahaa iimo kale oo aan nimanka ku takoori jirnay, iyagiina afka ka dhawran kari weynay. Ma idin la tahay say u oran jireen iyo saan annagu u dhahayno inay kala duwan tahay ama sababta ku kalliftay iyo tan annaga nagu kalliftay kala duwan tahay?. Waa wax qalbi ku jiroo Allaah kaliyaa og, waxaanse la maaganahay in aanaan dabinkoodana ku dhicin, daro adagna aan ku dhufano ee soo duceeya!.

6. Dhinac kale marka laga eego muddo dheer baan kursiga u soo gaatamaynay, maalintii ay noo bururuf tirina gaalo iyo gaaloraac baa naga dalfiyay. Haddaba ragga (Nuur cadde iyo Axmed C/salaam) mar kale noo faragoday oo qayga cagaha noo soo galiyay soo abaal nagu ma laha?,

mase iyagaa laftoodu saaxiibadood (maanaqaaxo) khaati ka taagnaa oo inaan la lagadnay danaynayeen, si kastaba ha ahaatee ugu yaraan waa isku meelgaarnaye ma laga yaabaa maadaama labadii Qunyarsocod (kooxda Nuur iyo tan Shariif) is garabsadeen in labada Qunweynsocod-na (muqaawamada iyo maanaqaaxo) iskaashadaan?.

7. Haddiise ay sidaa u sahlan tahay in raggii muddada dheer is hayay sidaa isugu yimaadaan maxaa diidaya in si daacad ah oo dhab ah looga wada hadlo waxa ina wada midayn kara. Dadku isku qabiil uma wada dhalan, hal gobolna kama wada imaan, hal waddana wax kuma soo wada baran, hal takhasus oo mideeyana ma jiro; sidaa darteed sow ma habboona in laga wada baaraandago waxa isu wada keeni kara oo ay wada aaminsan yihiin oo qofka miyi jooga iyo kan magaalo jooga ka dhexayn kara.

8. Maxaase mararka qaar utunta qof ahaaneed u qarisaa in la arko masaalixda guud ee lagu midasysan yahay iyo in loo tanaasulo danta diinta, dadka iyo dalkaba?.
Marka laysku soo duubo, haasaawahaani wuxuu farta ku fiiqiyaa xaajooyin badan oo garnaqsi u baahan, si aan kaftan ahayna laysula gorfeeyo, aaniguse waxaan uga jeedaa in aan biyaha fadhiya dhagax ku dhufto oo isu aamuska iyo hoos ka guuxa lagu badalo wada xaajaysi dhab ah oo qoto dheer; si la isu la gaaro xal joogto ah oo qanaaco ku dhisan.

Haasaawe siyaasadeed (Qeybta 2aad)

Axmed C/samad

alwaqaar@hotmail.com

Maqaaxida shaaha fadhigii 1aad

Soomaalidu geed ama gole ayay ku garnaqsan jirtay ama ku wada haasaawayn jirtay, hadda lafteeda kama taginoo markay ceelka biyood ama tuulada yimaadaan, aroor ha wadeen ama baadigoob ha ka yimaadeene war weeye iyo maxaa la sheegay ayay iska la soo horjeestaan, ugu dambayna waxa la sheegay maxaa ina kala gudboon iyo maxaynu ka qaban karnaa ayaa lagu soo gabagabeeyaa.

Soomaalida Magaaladu ma leh goleyaal lagu xaajaysto oo dadweynaha u wada furan marka laga reebo maqaaxiyaha shaaha iyo basaska dadweynaha. Haddaba qormadaan waxaynu saaka ku eegaynaa haasaawaha siyaasadeed ee maqaaxiyaha shaaha ee suuqa Bakaaraha.

Waxaa laga yaabaa in akhristayaasha qaar is dhahaan maxaa laga sheegayaa dad caamo ah oo fadhi ku dirir laqwi la fadhiya?, haddii wax la sheegayo maa laga hadlo goleyaasha dawladda iyo fadhiyada muqaawamada?. Waxaa ku quman raggaas inay gartaan dadka maqaaxida shaaha fadhiya inay ku jiraan raggii xercilminimada lawyuhu ku murxeen ama wax ku gorfayn jiray naadiga saraakiisha, golaha shacabka, akadeemiyada cilmi baarista iwm oo waliba ah raggii Xabashi lawyaha dhulka u dhigay, Nato iyo Waarso-na isku mar kaga cabaadiyay, haddase dan iyo duruufi meesha dhigtay!. Dhinac kale marka laga eegana waa ragga hadda gayfan

aabbayaashood, walaalohood, macallimiintoodii iyo kuwii taageerayay oo haddana la wadaaga diinta, dadka iyo dalka la difaacayo ama la samatabixinayo.

Kuraasta waxaa fadhiya rag da' walba leh oo ku kala duwan aqoonta, caqliga, waaya-aragnimada, xog-ogaalnimada, deegaanada ay ku dhasheen ama ku koreen iyo cidda ay taageersan yihiinba. Waxay raggaas ka midaysan yihiin in sida aynu maanta nahay aysan munaasib ahayn, in si kale la yeelana ay lagama maarmaan tahay, haddana mar kale ayay ku kala duwan yihiin sida xaaladdaan looga bixi karo. Si kastaba ha ahaatee qormada saaka waxaynu ku eegaynaa qaar ka mid ah su'aalaha raggaas u soo jeedinayaan wadaadada Soomaaliyeed iyo anigoo wixii ii muuqda uga jawaabaya illeyn saaxiibaday maqaaxiyaha shaaha kuma fadhi ku diriraane!.

Su'aasha koowaad: Horta anigu wadaadadaan cusub baan la yaabay maantoo dhan waxay ka hadlayaan hala midoobo iyo midnimadu waa waajib, iyaguna waa labaatan qolo, maalin walbana way sii badanayaan. Woxoodu waa la jiifiyaana bannaan!. Kuwii horaaba dhaamay oo iyagu dariiqooyin kala duwan bay ahaayeen laakiin ha la midoobo nama oran jirin!.

Jawaabta koowaad: waa runtaa!, waxaanse kuu sheegayaa in midnimada muslimiintu waajib tahay, in dadka loogu baaqana ay waajib kale tahay, haddii mid la gabana kan kale in la gabo ma aha. Tan kale adeer aynu kaftanee horta idinku ma israacsan tihiin?, hadday jawaabtu maya tahay annaga ma geedahaa na dhalay?, sow waxaan nahayba idinka idin kama wadano, ninkii aabbihiis raacase ma waxbuu dhimay?. Annagu diintii aan idiin soo baranayna (midnimo) idiin sheegnay, wixii aad nagu ababiseena (khilaaf) waa nagu ogtihiin!.

Su'aasha labaad: ii kaadiya aniga, hor iyo abbaato aniga maantaa la iiga tiriyaa; waayo waa markii iigu horraysay oo aan arko nimankaan oo garnaqsanaya, waxaan rajeynayaa in aan hadda ka dib si wanaagsan isu la jaanqaadi doono. Adeerow intaas kaftankii ha ahaatee qeybsankaan ma idinka dhabbaa mise qorshaad ku hoos wadataan?.

Jawaabta labaad: waa su'aal wanaagsane horta anigu nimanka middida daabka haya kuma jiro, waase wada raggaygii, haddaan malaha u wanaajiyase waxaan is iri nimanku jar bay maaganyihiin.

1. Waxaa laga yaabaa inay raggooda dhawr rac ka dhigeen oo ay doonayaan hadday u hagaagtana inay aakhirka meel isugu luga duwdaan, hadday xumaatana ay taayadii nagama qurunto oran doonaan!.

2. Waxaa kaloo suuragal ah inay cabsi ka qabaan in bohol looga tillaabsado oo markii woxooda laga kala tuuro la dhihi doono iska taga oo ay sidaas isu kala reebeen. Waxaa kaloo dhici kara in beesha caalamku ku cadaadinayso inay tanaasulaad badan sameeyaan, iyaguna ay ku xujeynayaan mucaaradka ayaan soo dumaynaaye noo suga, oo hadba qoladii wadahadal lala furo ay shuruudo hor lehdhiganayso; si labada cadaadis la isu la xooro.

3. Waxaa kaloo dhici karta inay ugu talogaleen in hadba koox cusub ay dawladda ku soo biirto oo xubno cusub laga siiyo; si ugu dambaynta awooddoo dhan ula wareegaan, waadna ogtihiin qeybtii la siiyay in 4.5 laga dhigay oo ragga soo galay ay wadaadadu ku yaraayeen.

4. Waxaan meesha ka marnayn in wadaadadu si istiraatiiji ah u fakarayaan oo ay arkeen in gaaladu dadkoodii isku laynayso, hadhawna ay isku jimlaynayso kuwii iyada la safnaa iyo kuwii ka soo horjeeday, wadaadaduna ay ku tashadeen inaan dadkooda mar dambe loo adeegsan ee ay gaalada ka soo faramaroojiyaan oo fursad u helaan inay dhaqan celiyaan; si ay xubno waxtar ah u noqdaan. Taas waxay haddaba u baahan tahay in ragga dabacsanaanta iyo dulqaadka leh marka hore la isu geeyo oo ay ugu yaraan salaadda iyo salliga Nabiga (scw) soo baraan, af xumada iyo daroogadana ka gooyaan ilaa aakhirka cimaamado cas cas iyo surwwel gaaban looga galinayo!.

5. Haddii dhinaca kale laga eegana khilaaf Soomaali baan u nahay, xukun iyo xoolo hadday yimaadaa-na hadde annaguba nafley baan nahay. Cabsi, is tuhun iyo kala shakina meesha kama marna, waana sababka ugu weyn ee la isla fahmi waayay baan is leeyahay haddii aysan jirin sir kaloo wadaadada u qarsoon.

Su'aasha seddexaad: Anigu Sheekhow nimankaan kuu turayoo kale ma ahi, su'aashayduna way adagtahaye haddaad u rag badsanaysid iyo haddaad hollinaysidba adaa yaqaan, waxayna tahay: intaan idin arkay dawladdii timaadaba waad gaalaysiin jirteen, mayd maxaa u dambeeyaa la yiri, saa la ye kaa la sii sido, tii hadda C/laahi Yuusuf baa u dambaysay. Waxyaalaha aad wax ku gaalaysiin jirteena waxaa ka mid ahaa diinta lagu ma dhaqmo iyo Itoobiya ayaad xiriir la leedihiin, idinkiina dawladdiina gashe, Itoobbiyana la heshiise ee nimanyohow (wax rag loogu maahmaaho maahee) wixiinu ma waxaa (hooyo illaa iga kicin mayne waad iga kacsanaysay?).

Jawaabta seddexaad: horta (ceeb Allaha asturo), saad sheegtayna waa su'aal culus, annaguna intaanu isu nimid arrintaan iskama aannaan waraysan, jawaabteeduna in loo dhanyahay bay ku fiican tahay, inaan gurmad iyo xogba u baahnahayna waa la hubaa, wixii hadda ii muuqda ayaanse ka sii oranayaa: horta gar iyo gardaraba annagoo 40 sano dadka u sheegaynay in ku dhaqanka shareecadu waajib yahay, sharciyaynta iyo ku dhaqanka wax ka soo horjeedana gaalnimo yahay naguma qumanayn inaan hal mar dalaq-dhahno dawlad aan diinta hirgalinayn ee xattaa hadday jiraan waxyaabo aan wax ku dhisnay oo aan gar ku leenahay waxay ahayd inaan dadweynaha dib ugu caddayno, kuna qancino.

Xagga xiriirka Xabashida ama gaalada kale wax is kama kaaya badalin oo sideedaba gaaladu waa kuwo markaas dagaal ina ka dhexeeyo iyo kuwo aynu nabad ama heshiis nahay. Kuwa dagaalku inaga dhexeeyana in heshiis muslimiinta dani ugu jirto la wada galo waa bannaantahay ee waxa la diidan yahay waa nin gaalada u dan-quminaya oo magaca ummadda wax kasta ugu saxiixaya ama ugu fulinaya. Si kastaba ha ahaatee wixii sharciga iyo danta ummadda khilaafsan cidna inay ku tillaabsato gar uma leh, ama wadaad ha ahaado ama waranle ha ahaadee.

Su'aasha afraad: suga suga!, horta wadaadku wuxuusan jawaab u haysan mabaadi' guud iyo sidii habboonaan lahayd ayuu ina ku dajinayaa, annaguna arrimo toos ah oo la taaban karaan kala hadlaynaa!. Haddaba yaanan taa hore ku noqon inta gurmad u imaanayee!, waxaa la leeyahay heshiiskaan aad gasheen ma aydnaan doonayn, danna ma aydnaan bidin ee cabsibaa idiin gaysayoo waa la idiin caga-jugleeyay, waliba inaad warqadaha idinkoon akhriyin saxiixdeen baa la sheegayaa!, ee bal taana ka waran. (nin kale): Waar bal usug, dee haddaa ma inuu ku cameeyaad ka doonaysay, mise inuu saaxiibadi eed aanu hubin saaro?.

Jawaab afraad: horta ma inaanan meeshii joogin, mise in dawladuhu cabsigalin iyo hungurigalinba isticmaalaan, waa tan horee meeshii ma joogin, Tan dambena ka shakiyi maayo, tanaasul la'aana marna ma jirayso haddii wada-hadal jiro, waxaase hubsiimo u baahan in saaxiibbaday mabaadi'dii iyo dantii guud uga tanaasuleen cabsi ama hunguri, taana haddaynaan hayn markhaati meeshii joogay waxaa caddayn doona dhaqankooda (war jiraaba Cakaaruu iman!). Tan aad tiri iyagoon akhriyin bay saxiixeena ilma adeerayaalow rag baan is haynaaye wax kastoo ay naga sheegaan ha noo qabanina!.

Su'aasha shanaad: (nin kale): oday cismaan bay fari u taagan tahay. Haa haye adeer cismaan. (Cismaan): horta aniga maanta waa iigu dhan tahay, wax badan oo igu wareegayay ayaa la soo qaaday, walow aan wali goconayo in jawaabuhu dul mar yihiin, waxaanse wadaadka ugu garaabayaa inay meeshu suuq tahay oo aan wax walba looga hadli Karin. Intaa ka dib waxaan doonayaa in la iga qanciyo nimankiinaan wadaadada ah oo askarta masaakiinta ahna laynaya nimankii waaweynaa ee soo dirsadayna sii daynaya, sida Xaabsade iyo raggii la socday. Tan kale culimaan nahayna waa na leedihiin, qabyaaladdii aad nooga digayseena hoostaad ka wadataan.

Jawaab shanaad: adeer cismaan waa … (nin kale): suga suga!, duhurkii ayaa soo dhow, meeshana dood aad u qiime badan baa ka socota, rag muhiim ahna waa isugu yimaadeen, aniga waxaa ila quman in maanta halkaa lagu joojiyo oo inta waqtiga inoo ka dhiman raggu isku barto. (mid kale): waa sax, wadaadka aan hadalka ka kala goynayna raalli ha naga ahaado. (nin kale): aniga waxay ila tahay raggu ha iska weysa doontee berri dib inoo ku dhiga oo isbarashada iyo jawaabta su'aasha shanaad ha laga bilaabo. (dhammaan): haye, waa sax.

Haasaawe siyaasadeed (qeybta 3aad)

Axmed C/samad

alwaqaar@hotmail.com

Maqaaxida shaaha fadhigii 2aad

Maalinkii labaad ayaa la isugu soo noqday maqaaxida shaaha, iyadoo horay loogu ballansanaa in kulanka labaad la isku barto, hadalkana laga bilaabo jawaabta su'aashii shanaad.

(Oday): waar maad hadalka inoo furtaan?. (Nin kale): adeer rag badan baa maqan ee ma la sugnaa is barashada oo jawaabtii su'aasha ma bilaabanaa illaa wadaadkii waa joogaaye?. (odaygii): waxba kama qabee, hadduu joogo ninkii su'aasha lahaa ha la bilaabo. (oday Cismaan): haa waa joogaaye inoo wada, sheikh ku soo dhawow. (Wadaadka): horta aan su'aashii ku soo celiyo; si raggu ula socdo hadalka: (waxaan doonayaa in la iga qanciyo nimankiinaan wadaadada ah oo askarta masaakiinta ahna laynaya nimankii waaweynaa ee soo dirsadayna sii daynaya, sida Xaabsade iyo raggii la socday. Tan kale culimaan nahayna waa na leedihiin, qabyaaladdii aad nooga digayseena hoostaad ku wadataan). Waxaa muuqata inay labo su'aalood yihiin ee tan hore …

(Nin taagan): anigu qoladiinaan baan la yaabay, markii Xaabsade la sii daayaad wada qeylinaysaan, maad markii Cismaan caato la sii daayay ka hadashaan, mise Xaabsadaa ka dambi badan?. (nin kale): waar idinku rag la sii daayaad isku haysataane annaga kuwayaga haadkaba looga soo dagi maayo. (Nin kale): haddee qolyihiinaan wadaadada eedo badan baad ka gasheenoo waad mutaysateen, bal eeg dawladdii Max'ed Siyaad, dagaalkii Bari, kii Gedo iyo kii hadda C/laahi Yuusuf!. (Mid kale): oo adeer hadday eed tahay waa maxay eedda ay S/land gashay?, waa annagaa nala wada qarxiyee?. (ku kale): waar bal wuxuu ku hadlayo maqal oo muslinka aad beecinayseen ma bilaashbaa?. (Nin kale): waar qoladaani annagayba dhib noo gaysteenoo kuwayagii P/land bay dad iibintii naga bareen!. (Nin kale): idinku hal halkoo nin oo la dilay ama la beeciyaad ka hadlaysaan, annaga meeqaa nala dilaayay oo nala beecinaayay?, qowmiyadda Banaadiri Ilaahay qabtaa!. (Mid kale): ar maxaa adi kaligaa la cataabaysaa waa la ina wada dulmiyaye?. (Kii hore): waar aamus idinkaa markoo Kamasle Hawiye sheegtoo ku nabadgalaye. (Niman kale): Bismillaahi, waar waa maxay dadkaan wada dulmani?. (wadaadka): waa runoo kulligood way wada dulman yihiin, cid kalena ma dulmiyine iyaga uun baa is dulmiyay, Ilaahay baan uga baryayanaa inuu dhibaatada ka wada saaro, ee aynu ku laabano jawaabihii su'aalaha:

Jawaabta su'aasha shanaad:

(wadaadka): Horta waxaa la yiri: geeri nin aadan aqoon iyo geeljiray ku fiican tahay ee nin walba kii uu garanayay haddii uu sii daayay maxaa ku jaban!. Intaas waa kaftankiiye horta muslinka cududaar baa loo raadiyaaye male xun kuma fiicna. Mugga sow arrimahaan midkood ma dhici karto:

a) in xilligii Xabashidu joogtay ay is lahaayeen dadku ha cabsadoo yaysan gaalada la soo safan, mar hadday baxdayse ay joojiyeen dilkii askarta maadaama khatartii yaraatay.

b) In ay sulxi (heshiis) kula galeen iyagoo magaalada jooga inay ammaangaliyaan, magaaladana ay si nabadgalyo ah ugu wareejiyaan.

c) In ragga la sii daayay ay si qarsoodi ah ula shaqayn jireen wadaadada oo ay ahaayeen rag xilkoodii gutay.

d) In ay si dheheen waad guuleysateene cafis u fidiya dadka idinka soo horjeeday; si aysan maamulka iyo nabadgalyada idiinka qasin ama ay u soo hanuunaan.

Isku soo duuduuboo sow bishaaro ma aha hadduu intaas ku dhamaaday dilkii Soomaalidu, illeyn sidaad u dhahdeen intaan kuwii waaweynaa sii deynay, kuwa yaryar dili maynee?.

(Wiil xanaaqsan): bal kuwaan fadhi ku dirirka la fadhiya eega oo mujaahidiintii u soo dhigtay, wallee oday badan oo koofiyad bacle ah in abaalkiisa laga waraabinayaa. (Oday): waar maandhow kumaad ahayd?, sow waalidkaa ma ahin maxaad noo aflagaadaynaysaa?, ma waadan xishoonayn?. (wiilkii): idinku koofiyadbacle ayaad ka xanaaqaysaan mujaahidiintana qabyaalad baad ku sheegaysaan. (Nin kale): oo waa Max'ed Yaree, adeer waa ina Ciise bulxan. (Odaygii): ma la hubaa?, Ciise anigaa bud-dhigay, waxay xabbaddu ku dhacday isagoo ashahaadanaya oo

na leh: waar gaalada iska celiya. Subaxdii intaanaan dagaalka galin oo dhanna Qur'aankuu afka ku hayay, Alle muxuu Ilaahay Shahaado weydiistay!.

(Wiilkii): oo adeer ma jihaad baad ku jirteen, mise qowmiyad baad u dirirayseen?. Adeer ma nin aakhiro u socdoo muslin ah baa janno uu arkahayo naar ku badalanaya?, in aan kirishtaanka layno oo muslimiinta ka xorayno ayaan rabnay. (Wiilkii): maa shaa' Allaah, adeer inaad qowmiyad kaliya u dagaalamayseen baan u qabay. (Nin kale): dhallinyaradu waa khayr doon, khayrkana inay kaligood ka shaqeeyaan bay u qabaan, aan ku kala baree Max'ed yaroow dadkaan meesha fadhiya waa wada mujaahidiin oo iyagaa dagaalka galay ama ilmohoodii baa ku shahiiday ama wali xabbadda ridaya. Hadda odaygaan kula hadlaya labo wiil oo uu dhalay baa dagaalladii hadda ku shahiiday, wiil gabadhiisa (inantiisa) qabana wuu ku shahiiday, carruurtoodii oo dhanna isagaa wada haya, isna intaas xooluhuu bixinayay.

Odaygaan kale wiil uu dhalay iyo miduu awoowe u yahaybaa shahiiday. Gabadha shaaha gadaysa curadkeedii iyo kii ku xigayba waa shahiideen, odaygeediina dagaalkii 77 buu ku shahiiday oo iyadaa hadda reerkii u xammaalaysa. Ninkaan kale wiilkiisii iyo walaalkiis ayaa isku maalin shahiiday. Seddexdaan is dhinac fadhida waa wada dhaawac oo waliba midbaa seddex goor soo dhaawacmay. (Nin kale): waar intaasi ku filane iska daa. (wiilkii): wallaahi wax badan baa maanta ii kordhay, illeyn dadka darbiyada wada fadhiya waa wada mujaahidiin iyo aabaa' almujaahidiin. (oday kale): adeer maalintii dagaalka laga soo baxay raggii gurmaday oo in mujaahidiinta laga dabayimaado ka taxadarayay waa kuwaan, oo ku guulaystay in aan suuqa Bakaaraha la soo galin. Waxaa kaloo meesha fadhiya raggii dhaqaalaha soo uruurinayay iyo kuwii dhufaysyada idiinku keenayay raashinka, biyaha iyo rasaasta ama dhaawaca soo daldalayay.

(Wiilkii): Allaahu akbar, wallee idinkaaba naga dadaal badnaa, waase in dhallinyarada loo sheego arrintaas, waliba anigu ragga madaxda noo ahna waan u sheegayaa. (Wadaadkii): horta in la iswaraysto qiimeheeda daya, Max'ed yare wuxuu u fakarayay inay meesha fadhiyaan cadaw diinta iyo ehelkeeda la col ah, markuu xaqiiqadii ogaadayna wakaas ku farxay ee qiray in odayaashu ka dadaal badnaayeen, idinkuna markaad aabbihi garateen waa idinkaas isla wada muraaqooday ee waxaan leeyahay Soomaaliyeey yaan shaydaan idiin kala turjumine is waraysta walaalo aan is ogayn baad wada tihiine. Haddaba waxaynu ka jawaabaynaa qeybtii su'aasha inoo ka dhimanayd.

(Wadaadka): Tan ku saabsan qabyaaladda sharci ahaan inay xaaraan tahay waa ka wada dharagsanahay, danta muslimiintana ay burburinayso, cadowgana hiil u tahay, laakiin nimanyohow annagu hadda ayaan tartanka siyaasadda si dhab ah u soo galnay Soomaalina iyadoo awalba qabyaalad ku ibtilaysnayd baad 4 ½ ka dhigteen, nin walbana waxaa dhahdeen reerka soo mar. Haddaba ma annagaa doqomo ah marka aad reerihii aan ka dhalanay tolbeelay beenbeen ah nooga qaadanaysaan?.

Midda kale haddii reer walba wadaadkooda soo caraabiyo, ajandayaal gaar ahna u soo dhiibo oo markuu fuliyo aad na tiraahdaan qabyaaladaystayaal baad tihiin nimanyohow arrintaas ma na qabataa?. Dhinac kale marka laga eego wadaadadu qabyaaladda ma jecla, kumana dhaqmaan, laakiin labo wadaad haddii lagu arko waa inaynu u garawno: wadaad reerkoodu kursiga ku fadhiyo oo inuu diin ku difaaco laga rabo iyo mid markaas reerkoodu kursiga baadigoobayo oo

laga rabo inuu ninkii lagu dilo fatwoodo shahiidnimadiisa. Haddii labadaas loo garaabayna ninka isagu afkiisa wax u doonaya soo isna in loo garaabo ma mudna?.

(Nin caraysan): waar aamusa aamusa!, ma waxaa idinka baxsan waayay dawladda ummaddu soo dooratay?, waxaad wadaan waa xadgudub, qabyaalad iyo wax daran baa idinka buuxa, dawladuna tillaabo shareecada waafaqsan bay idinka qaadaysaa haddaydnaan joojin dicaayadaha iyo waxa aad wadaan. (Oday): adeer ninkaan xiiqsana xaggee nooga yimid?, waar maandhow naga xishood. (Nin kale): adeer soo fariiso adigaa qanci doonee, waar Maxamed yarrow bal la hadal adigaa xanaaqii kaa ba'aye!. (Ninkii caraysnaa): ma xiiqsaniye dicaayada aad meesha la fadhidaan baan diidanahay. (Oday kale): adeer horta dawladda aad sheegaysid ragga ugu muhiimsan anigaa Qur'aanka soo baray, raggaan ila fadhiyana waxay isugu jiraan kuwii iskoolada wax ku bari jiray iyo kuwii masaajidda wax ugu akhriyi jiray.

Qabyaaladda aad nagu sheegaysidna waxaa fadhiya madaxweynaha iyo ra'iisal wasaaraha adeeradood, iyo wasiirada qaarkood aabbayaashood, raggaanina waa raggii dawlad kastoo timaadaa u baahnayd oo ay talo weydiin lahayd ee waxba adeer ha is xiijin. Tan kale waa raggii wadaadada iyo dadweynaha isku xiray si gaalada dalka looga saaro. (Ninkii caraysnaa): adeer raalli ahaada, idin ma garanayne. (odayashii): waxba laguuma haysto ee soo dhawow waa adeeradaaye.

(Oday): isbarashadii aynu ku ballanay meeday?. (Nin kale): kolley kama wada gaarnee inoo bilaaba:

Isbarasho: nin ragga wada yaqaan hadduu jiro ha is baro, haddii kale nin walba ha is sheego, oo deegaankiisa, qabiilkiisa, takhasuskiisa iyo khibraddiisaba ha ku daro. (nin kale): maad naga daysaan qabyaaladda iyo gobolaysiga oo magacyada iyo shaqada kaliya la sheego?. (Oday): adeer annagu dadkayaga iyo dalkayaga ma kala soocnee waxaan rabnaa inaad dadkiina iyo dalkiina kala barataan, Soomaaliduna waxay tiraahdaa: (dad aqoon la'aana waa la qadaa, dal aqoon la'aana waa la habaabaa). (nin kale): waar saa inoo ku wada, dadkaana cidi ma wada taqaane nin kasta ha is sheego. (dhammaan): waa yahay, hawraarsan. Wadaadku isagaa ina ku cusube ha inoo bilaabo (wadaadka): maya ninka inoo ku weyn ha bilaabo. (nin kale): waa sax, haddaba Gen. Caliyow adaa ragga ugu cirroweyne bilow. (Gen. Cali): waar taydu waa cirro caanoode rag iga waaweyn baa meesha fadhiya!, kolleyse haddii farta la igu fiiqay waa bilaabayaa.

1- Magacaygu waa Cali-nuur , waxaan ku dhashay magaalada Dila, waxaana ahay reer Nuur. (nin kale): Dila iyo reer Nuur-na maxay ahaayeen, Cali Aadan nin Gudabiirsay ah oo reer Boorame ah baan u qabaye?. (Nin kale): qosol, war ninku badawsanaa!, waar horta magaca iska sax, Gudabiirsay maxay tahay?, Gadabuursi dheh, waliba isaguna waa naanayse, magucu waa Samaroon Saciid. Reer Nuur-na waa jifo ka mid ah reerka, Dila-na waa degmo u dhexaysa Boorama iyo Gabiley oo raacsan gobolka Awdal. (Nin kale): afkaaga caano lagu qabay, wado Genarale.

Waxaan ku takhasusay abaanduulka ciidanka. Xagga khibradda waxaan 25 sano ka soo shaqeeyay dhawr hoggaan oo ka mid ah hoggaanada wasaaradda G/dhigga, waxaan kaloo bare sare ka noqday kulliyadihii abaanduulka iyo istiraatiijiyada ee qaranka.

2- Magacaygu waa Jamaal cadde, waxaan ku dhashay magaalada Fiiltu, waxaan u dhashay Abrashe. Waxaan ku takhasusay dagaalka jabhadaynta ah, waxaana ka mid ahaa aasaasayaashii Jabhadda Xoraynta S/galbeed (WSLF), walina waxaan ku hawlanahay xoraynta dhulkaas.

(Nin kale): waa halgame weyn!, Jamaalow ma noo sheegi kartaa meesha ay dalka kaga taal magaalada Fiiltu iyo Abrashe meesha uu galo, ma Daaroodbaa mise waa Hawiye?. (Halgame Jamaal): Fiiltu waxay ku taal dalk S/galbeed ee Xabashidu inaga haysato, waxayna u dhexaysaa Doolow iyo Nagayle. Abrashe-na waa mid ka mid ah jifooyinka Qabiilka Soomaaliyeed ee Dagoodiya. Tan kale adeer Soomaali Hawiye iyo Daarood kuma koobna ee ogow.

Haasaawe siyaasadeed (Qaybta 4aad)

Axmed C/samad

alwaqaar@hotmail.com

Maqaaxida shaaha fadhigii 3aad

Waxaa la isugu soo noqday maqaaxidii shaaha si halkii la marayey looga sii ambaqaado. (Nin): Shalay laba nin baa la wada bartay ee horay ha loo sii wado oo waliba Cabdulle ha bilaabo. (Nin kale): Waar horta marka hore ha la iswaraysto. (Rag kale): waa sax ee maxaa dalka ka cusub?. (Nin): Intii aynu kala maqnayn ciidamo gaalo ah baa dalka yimid, culimada hadalkeediina way khilaafeen. Waxaa kaloo cusub in wasiirkii Arrimaha gudaha Sh. C/qaadir C. Cumar qarax lala beegsaday, dhaawac fudud baana ka soo gaaray, xoghayihiisiina waa ku dhintay. Waxaa iyana dagaal ka dhacay Deg. Yaaqshiid. Waxaa kaloo la sheegay in Sh. Xasan Daahir Eretereya ka baxay oo uu Khartuum tagey. (Oday): waa seddex masiibo! Iyo hal bishaaro.

(Nin): horta ciidanka gaalada waa la filayey oo nabar aad filaysey nusqaan mooyee naxdin ma leh; maxaa yeelay nin kastoo caqli leh ama siyaasadda wax ka fahmaya waa garan karay in aan dawlad wadaado hoggaaminayaan oo madaxbannaan gaalo samankaan yeelayn. Hadalka culimadana awalba inay gaalo u hoggaansanto lama sugayn, maxaadse gaalada ka sheegaysaa innaga qaarkeen baanba u hoggaansamayne!.

(Nin kale): waa runtaa, labo ujeeddaa ugu weyn waxa ay ciidamada gaaladu qabanayaan: a) haddii kooxaha muqaawamada ee mucaaradka ah isku dayaan inay Xamar qabsadaan way ka celinayaan. b) haddii madaxweyne Shariif isku dayo inuu ka boxo heshiisyadii uu galay oo dawlad islaami ah ku dhawaaqana way ka hortagayaan.

(Nin kale): inay diinta iyo akhlaaqda fasaadiyaana waa rabaan. (oday): waa dambe mooyee hadda taasi uma sahlana; maxaa yeelay dadkaba ma dhexgali karaan oo in la qafaasho ama la laayo ayay ka cabsanayaan. (Nin kale): Waar iska aamus, sow tan jaraa'idku qorayaan gabar Soomaaliyeed oo Kambaala ka baadigoobaysa askari Ugandan ah oo ilmo ka dhalay!. (Dadkii oo

dhan): Alla hadalku xanuun badanaa, ma gabdhahayagiibaa gaalo madaw maanta garcisay?!, annagaa waxaasoo dhan isu leh.

(Nin): Taas waa iska caddahaye yaa ka dambeeyay qaraxii wasiirka loo gaystay?. (Nin kale): horta cid sheegatay lama hayo, cid falka loo xirayna ma jirto, cid si toos ah loogu eedeeyayna ma maqal. (Oday): haddaba ragga aqoon-gaarraha ah ha falanqeeyeen arrinta oo waliba Ciise ha bilaabo isagaa ugu mudane.

(Ciise): horta dadka qolo walba cidda ay is hayaan ayay eedda dusha u saaraysaa, sidaasna xaqiiqada lagu ma ogaan karo. Dadka qaar waxay farta ku fiiqayaan sirdoonka dawladaha shisheeye, kuwana madaxda dawladda qaarkeed, kuwo kelena kooxaha muqaawamada. Si kastaba ha ahaatee waxaa ila quman in aynu is weydiino yay dani ugu jirtaa dilka wasiirka, maxayse tahay sababta isaga gaar ahaan loogu abbaaray?. Waxay ila tahay ninkaani waa nin Sheekh ah oo kaalin lama illaawaan ah ka soo qaatay jihaadkii Xabashida lagu la jirey, muqaawamada iyo dadweynaha dhexdoodana sumcad wanaagsan ku leh, wuxuuna madax ka yahay wasaarad muhiim ah.

Sababaha keeni kara in isaga si gaar ah loo khaarajiyana waxaa ka mid ah: in dawlado iyo dad kaloo badan ay u arkayaan inuu khatar ku yahay danaha iyo mashaariicda ay dalka ka fushadaan, waliba wasaaradda Sh. C/qaadir loo magacaabay waa wasaaradda lagu la diriro diinta iyo dadkeedaba, mana doonayaan in uu ogaado faylalka sirta ah ee wasaarddu hayso. Waxyaabaha kaloo loogu daw-gali karo waxaa ka mid ah inuu isu soo jiidi karo kooxaha muqaawamada iyo dawladda, taasina dan uma aha dadka dalkaan danaha gaarka ah ka leh. Waxaan iyana laga boodi Karin in dilka Sh. C/qaadir cadawga ummadda labo faa'iido u leeyahay oo kala ah: in jagada uu hayo laga bannaysto; si cid lagu kalsoon yahay loogu dhiibto iyo in muqaawamada iyo dowladdu is dilaan, ka dib marka lagu qanciyo dawladda in muqaawamadu dishay wasiirka; si aysan u guulaysan dadaalada heshiisiineed ee socda.

Haddaba anigu waxaan qabaa in weerarkaan ay ka dambeeyeen dawladaha shisheeye, ha adeegsadeen raggii la shaqayn jirey ee dawladda galay ama rag kaloo u qarsoone. Tan kale waxaa ii muuqata in aan arrintaan muqaawamadu ka dambayn; maxaa yeelay wax faa'iido ah oo ay ka helayaan dilka Sh. C/qaadir ma jirto, dhib dawladdu ku haysayna dilkiisu ka fududayn maayo, haddii la dilana dawladdu u burburi maysee jagadiisa nin diinta u cadaw ah in loo dhiibaaba dhici karta. Xataa haddii aynu ka soo qaadno inay goosteen inay laayaan madaxda dawladda waxay ka bilaabi lahaayeen qoloba qolada ay ka fogtahay ee kama bilaabeen ninkii ugu dhawaa ee haddii xaalku ku adkaado ay Ilaahay ka dib u baxsan lahaayeen. (Nin kale): haddii cid muqaawamada ah falkaas loo tiiriyana waxay u badan tahay inay dad lagu dhexdarsaday yihiin.

(Nin): Afkaaga caano lagu qabay, wallee inaad wax lagu qanco keentay. (Nin kale): taas Ciise ayaa inaga kaafiyaye bal dagaalkaan Yaaqshiid nooga warama. (Oday): anigu waxaan u fahamsanahay inuu ka mid yahay dagaaladii aynu 20ka sano soo wadnay. (Nin kale): haayoo wiilal iyo weelal buuxsamay baa la marinayaa, dawladnimo iyo jihaadna waa lagu sheegayaa!. (Oday kale): mayee wuxu dawladnimo iyo jihaad midna ma ahayne rag isku jifo ah oo shaydaan isku qaaday bay ahaayeen, haddana xabbaddii waa la joojiyay, dhaqsana waa loo xallinayaa.

(Nin): Yaab, waa adigu gacantaada maalin walba isku gawrac!!. Bal Sheekh Xasan warkiisa na siiya.

(Oday): horta waxaa la hubaa inay dad badan oo aan doonayn inuu dalku dago dhibsanayaan imaanshaha Sheekha. Si kastaba ha ahaatee waa wax lagu farxo mar haddii Ilaahay Sheekhii xera baasta nooga soo saaray, waxaase is weydiin leh ma xal iyo badbaadin buu noo soo wadaa, mise … (Nin kale): aniga waxay ila tahay imaanshaha sheekhu mar walba waa guul diinta iyo ummadda u soo hoyatay. Tan kale aniga Sheekha waxaa la iigu sheegay nin diin iyo Soomaalinimo jecel, waxaase inta badan laga didaa hadalada uu warbaahinta siiyo, aniguna kolley imaanshihiisa waan bishaaraysanayaa. (Oday): horta raggii meesha ma ka soo wada dhammaadeen, mise qeyb baa ku hartay?. (Nin): kolley intii wadaadada ahayd ka wada timid, kuwii kalase in qaar wali jiraa dhici karta. (Odaygii): aniga waxay ila tahay in labo cadaw isku kaaya haysteen, haddii midkood Ilaahay naga qaadayna waa shar Alle naga fayday, inuu kan kale naga dulqaadana waan rajeynaynaa. (Nin kale): waar nin sidii Ciise arrintaan noogu qaadaa-dhiga miyaan la helayn?. Waar bal Muusoow ku soo dhawow.

(Muuse): Si arrintaa looga hadlo waa in la xaddido xiriirka Sheekhu la leeyahay awoodaha jira. Kolley mid uun awoodaha siyaasiga ah ee wadaadada ka mid ah ayuu la safan doonaa, wuxuuse aniga ra'yigayga inoo ku nafci badan yahay inuu hay'adda culimada ku biiro oo uu xalka wax ka baadigoobo. (Nin): laftaydu saasaan qabaa inuu ku waxtar badan yahay. Haddii uu taa yeeli waayana inuu Xisbiga ku biiro ayay u dhowdahay; maxaa yeelay waxaa hoggaamiya garabkii Asmara ee isbahaysigii dibuxoraynta.

(Muuse): haddaba hadduu hay'adda culimada ku soo biiro wax weyn buu ku soo kordhin doonaa ; maxaa yeelay wuxuu xiriir adag la leeyahay ragga hoggaamiya Xisbiga iyo Shabaabka labadaba, qolada dawladdana raggiisii ayaa ku dhexjira, in kastoo waxoogaa xurguf ah dhexmartay. Wax kale haddii uusan qaban Sheekhu wuxuu ka hortagi karaa colaad wadaadada dhexmarta. Haddii uu Xisbiga galana wax badan buu ku qancin karaa raggiisa, wadahadal dhab ahna wuu la gali karaa dawladda iyo Shabaabka.

(Niman): waar maanta iswaraysigii waa ina la dheeraadaye halkaa ma ku joojinaa?. (dhammaan): haaye isbarashada inoo wada. (Nin): Odayaasha ha la hormariyo waatii la yiriye maanta oday Cabdulle ha bilaabo.

3. Aniga waxaa la i dhahaa: Cabdulle Maxamed, waxaan ku dhashay Galhareeri. Waxaan ahay Murusade. (Nin kale): war bal sug!, maxaad sheegaysaa sow Mururs ade ma aha magucu?. (Mid kale): War mayee waa Muransade. (Mid kale): Kaw! waar ma ninkaa weynbaad magaca tolki ku aamini weydeen?. (Nin kale): waqtigu waa yaryahaye kaftanka iyo sheekada aad dhexgalinaysaan ina ka daaya.

(Cabdulle): anigu maba hadal badniye, ragga kalaa loo jeedaa. War badana looma baahnee saan u sheegaa saxee u qaata. Waxaan bartay cilmiga siyaasadda, waxaan muddo 23 sano ah ka soo shaqeeyay wasaaraddii arrimaha dibadda Soomaaliya.

4. Aniga waa Sh. Mukhtaar Macallin. Waxaan ku dhashay Buurhakaba. Waxaan ahay Eelaay. (Nin kale): Waar Eelaay way badan tahaye ma siddeed baad tahay, mise sagaal. (Mid kale): dee

mayee waa toban!. Qosol ka dib Sh. Mukhtaar: horta dadkaan Digil iyo Mirifle ayaa kor laga wada dhahaa. Mirifle (Raxanweyn) ayaa u qaybsama siddeed iyo sagaal. Eelaay-na waa qeyb ka mid ah siddeeda ee saa u ogow. (Nin kale): waa ok-ye ka soco. (Sh. Mukhtaar): Waxaan jaamacadda Azhar ka soo baxay 1964kii, ka dibna waxaan ku takhasusay maaddada Usuul alfiqhi. Waxaan noqday baresare jaamacadda ummadda iyo garsoore, kitaabbadana waan akhriyaa.

5. (Nin): waar bal suga qoladiinaan Wanlaweyn, wax kasta waad isku koobaysaan, xataa hadalka dadka wax ka siin maysaan!. (Nin kale): oo Jaamac nuuroow haddaad dalkii goosateen sow taladiina ma aydnaan goosan?, (Jaamac nuur): dee haddaa ma nin aan waxba kuu hambaynayn baad wax la wadaagi karaysaa?. (Nin kale): waar ninka hadalka u daaya, soo daa Jaamac nuuroow. (Jaamac nuur): dee magicii waa kaayoo la sheegay, waxaana ku dhashay Sallaxley, waxaana ahay Ciidagale.

(Nin kale): waar bal u sug, waar nimanyohow jifooyinkaan yaryar ee aad maantoo dhan nagala daba-meeraysanaysaan naga daaya oo Jaamacow adigoo raalliya habraha kaad tahay noo sheeg, meelahaan hoose kala garan maynee. (Nin kale): Ilaahow waxaan wax aqoon ha cadaabin, ma maantaa Ciidagale jifo yar noqday!, waar nimanyohow markay arrintu joogto Afarta Gambar, Laba iyo tobanka koofiyadood, Siddeed iyo Sagaal iwm ka hadla, ee wixii Balcad ka shisheeya isaga aamusa!. Waar nimankan aad jifada ku sheegaysaan waa boqortooyadii reer Sheekh Isaxaaq. Tan kale Sh. Isaxaaq siddeed oday buu u kala baxaa, waxayna u qaybsmaan laba bohood oo la kala dhoho: Bah habarmagaadley iyo Bah habarxabuusheed. Habrahaan seddexdaayoo aad maqashaana Ciidagale kama mid aha, Isaaq-na seddexdaas kuma wada abtirsado.

(Nin): adeer annagu Isaaq baan u naqaan, adiguna Isaxaaq baad ku celcelinaysaa. (Ninkii hore): dee wax kale ma jiraane qolyihiinaan reer koonfureed ee aan X-da Karin baa la idiin fududeeyay!.

(Jaamac nuur): Waxaan bartay cilmiga nabadsugidda, waxaan inta badan u xilsaarnaa faylka xoraynta Jibbuuti, markay xorowdayna waxaan noqday madaxa hoggaanka dabagalka ciidanka nabadsugidda Soomaaliyeed. (Nin): raalli ahaada inta aan laga bixin ma ii sheegi kartaan halka ay dhacdo magaalada Sallaxley?. (Nin): kolley waxay ka mid tahay degmooyinka raacsan Hargeysa.

6. Aniga magacaygu waa Maxamuud Nuur , waxaan ku dhashay magaalada Ijaara, waxaana u dhashay Tolomogge. (Nin kale): oo Maxamuudoow ma waadan Ugaadeen ahayn?, waa maxay Tolomoggahaan aad sheegaysid?, Ijaara-se xaggay ku taal?. Horta ninyohoow waxaadan aqoon kuma ceebaysnide, intii aad garanaysay baa kaa qaldan ee horta magucu waa Ogaadeen ee U ma aha. Tan Kale Tolomogge qeybaha Ogaadeen buu ka mid yahay, wuxuuna kala degaa S/galbeed, NFD iyo koonfurta Soomaaliya. Faracyadiisana waxaa ugu caansan Cabdalle iyo Cawdaaq. Ijaara-na waa degmo ka mid ah gobolka NFD ee Kenya ina ka haysato.

(Nin kale): duhurkii wax yar baa ka haray ee inoo dadajiya. (Maxamuud): Waxaan bartay Qaanuunka dawliga ah. Xagga khibraddana laga bilaabo maalintaan 16 sano gaaray ilaa intaan

hawlgabka noqday waxaan u taagnaa xoraynta gobolka NFD. Madaxweynayaashii Soomaaliyeed oo dhan-na waxaan u ahaa la taliye arrimaha Kenya iyo gobolka NFD.

Haasaawe siyaasadeed (qeybta 5aad)

Axmed C/samad

alwaqaar@hotmail.com

Waxaa la isugu soo noqday haasaawihii iyo isbarashadii ka socotay maqaaxida shaaha. Ugu horrayn waxaa hadalka lagu bilaabay isbarashada, waxaana lagu soo dhaweeyay Oday C/laahi oo ku bilaabay sidatan:

7. Magacaygu waa C/laahi Cali, waxaan ku dhashay Caliyaalo, waxaan ahay Reer Mataan. (Nin): malahayga Caliyaalo waa tan inoo dhow, Reer Mataan-na waa uun Abgaal. (C/laahi): haayoo waa Wacbuudhan Abgaal. (Nin kale): oo Abgaal waa immisa qolo?. (Oday): miyaadan marna maqal seddexda Abgaal?, waa Harti Abgaal, Wacbuudhan Abgaal iyo Warculus Abgaal (Wacaysle).

(C/laahi): waxaan bartay kabtanimo (Naakhuude), waxaana u leeyahay khibrad 22 sano ah. (Nin kale): waa badmareen weyn oo maja ka cirrow ah!.

8. (Nin): aniga waxaa la i dhahaa Warsame Nuur, waxaan ku dhashay Miyiga Caabudwaaq, waxaan ahay Reer Dalal. (Nin kale): Alla illaa reer abtigay C/waaq-na waa dagaan, xaggaas iyo Q/daharre ayaan ku ogaaye!. (Oday): war Dalalku Dalal Magan maahee waa Dalal Ugaas Diini. (Nin): oo adeer maxay kala yihiin?. (Odaygii): midna waa Ogaadeen, midna waa Marreexaan, Warsame-na waa kii Marreexaan.

(Warsame): waxaan bartay cilmiga dhirta, waxaana 15 sano ka soo shaqeeyay Wasaaraddii Xannaanada Xoolaha iyo Dhirta iyo Daaqa.

9. (Nin): Magacaygu waa Yaxye dheere, waxaan ku dhashay Nus-dariiq, waxaan ahay Reer Aw-Gaadsan. (Nin): oo adeer Aw-Gaadsan hadda ka hor ma aannaan maqale ma Gaadsankii Direed oo aad Aw ku darteenbaa mise waa mid kale?. (Oday): war nimanka Aw-Gaadsan waa la dhahaaye malaha kuwa Reer Nus-dariiq baa ugu wadaadsanoo Aw-nimadii ku hartay!. (Nin): adeer Nus-dariiq xaggee ku taal?. (Odaygii): waa S/galbeed oo waxay u dhexaysaa W/dheer, Q/daharre iyo Dh/buur.

(Yaxye): waxaan ku gaboobay macallinimo D/sare oo aan muddo 26 sano ah ku shaqeynayey.

10. Magacaygu waa Muuse yare, waxaan ku dhashay Qoryooley, waxaan ahay Quraanyow. (Nin): waar Qoryooley garanaye Quraanyow waa ayo?. (Oday): adeer Quraanyow waa qeyb ka mid ah tolweynaha Soomaaliyeed ee Garre oo u kala baxa Tuuf iyo Quraanyow[1], waxayna degaan S/galbeed, NFD iyo Koonfurta Soomaaliya.

(Muuse yare): waxaan ku takhasusay xanuunada dhimirka. Xagga khibrada waxaan 22 sano ka soo shaqeeyay isbitaalo dalka iyo dibadda ah.

11. Magacaygu waa Colaad Cabdi, waxaan ahay Reer Geeddow, waxaana ku dhashay Guriga Muusadoon. (Nin): adeerow ma noo sheegi kartaa Reer Geeddow iyo Guriga Muusadoon?. (Oday): waa rag aan dalkooda iyo dadkooda waxba ka aqoon. Waar Reer Geeddow waa qeyb ka mid ah beelaha Reer Shabeelle. Guriga Muusadoon-na wuxuu raacsan yahay degmada Qallaafe.

(Colaad): waxaan ahay Enginneer dhisme, 30 sanoo khibrad ahna waa leeyahay.

12. Magacaygu waa Rabbiile Ciise, waxaan ahay Mammaasan, waxaana ku dhashay Cali-sabiix. (Nin): Kolley Mammaasan waa qabiile noo jilciya, iyada iyo Cali-sabiixba. (Nin kale): Walaal Mammaasan wuxuu ka mid yahay beesha Ciise oo deegaankeedu yahay S/galbeed, Jibbuuti iyo gobolka Awdal. Magaalada Cali-sabiixna waa magaalo Soomaaliyeed oo Jibbuuti ka mid ah.

(Rabbiile): waxaan bartay cilmiga taariikhda, muddo 31 sano ahna waxaan ahaa bare sare iyo qoraa. (Oday): waar waa ragga loo baahan yahay.

13. Aniga waxaa la i dhahaa Xaaji Ibraahin, waxaan ku dhashay Bandar Bayla, waxaana ahay Muuse Suldaan. (wiil): beesha iyo deegaanka midna ma garan. (Oday): Bandar Bayla waa degmo raacsan gobolka bari, Muuse Suldaana waa qeyb Cismaan Maxamuud ka mid ah.

(Xaaji Ibraahim): waxaan bartay garsoorka, khibraddana 28 sano ayaan ku shaqeeyay garsoore-nimo.

14. Magacaygu waa Yuusuf Xasan, waxaan u dhashay Cali madaxweyne, waxaan ku dhashay Maxaas. (Oday): maandhooyinow kolley waa na waydiinaysaane Cali madaxweyne waa Xawaadle, Maxaas-na gobolka Hiiraan bay ka mid tahay, ee dalkiina iyo dadkiina barta.

(Yuusuf): waxaan bartay cilmiga dambibaarista, waxaan 27 sano ka soo shaqeeyay ciidanka bileyska Soomaaliyeed.

15. Yaasiin Cabdi ayaa la i dhahaa, waxaan ahay Axmed Faarax, waxaana ku dhashay Qoriyaale. (Wiil): in la isu caddeeyaan idiinka baranaye, reerka iyo deegaankaba noo sharxa. (Oday): magaalada Qoriyaale waxay ka tirsantahay degmada Burco, Axmed Faarax-na wuxuu ka mid yahay beelaha Maxamed Abokor ee Habarjeclo.

(Yaasiin): horta inay wadaadadu na garanwaayaan gar maaha; waayo waxaa suldaankayagu ka mid yahay culimadooda ugu waaweyn, oo isku rag baan nahay. Xagga aqoonta iyo khibraddana waxaan soo bartay maamulka, wasaaradda maaliyaddana 24 sano ayaan u shaqeeyay.

16. Mayow Aweys ayaa la I dhahaa, waxaan ahay Geledi, waxaana ku dhashay tuulada Buri ee degmada Afgooye. (Nin): horta Bagadi iyo Geledi maxay kala yihiin?. (Oday): waa labo qabiil oo Soomaaliyeed oo wada dega gobolka Sh/hoose. Geledi jiidda Afgooye ayay degaan, Bagadi-na jiidda Aw-dheegle. Nimanka Geledi waa saldanadii muddada dheer ka talin jirtay gobolada koonfureed.

(Mayow): waxaan bartay duuliye-nimo, waxaana 12 sano ka shaqeeyay ciidanka Cirka Soomaaliyeed.

(Nin): Waar meeshu qabaa'il iyo gobolo badanaa!. (Oday): dee Soomaaliweyn baa maqaaxida Xaawo Siciid isugu timid!.

(Xaawo): sababtu waxa weeye inaan Soomaali badan qaraabo la ahay, dhammaantoodna ay ii siman yihiin, oo aan si walaalnimo ah ula wada dhaqmo. Tan kale ragga maqaaxidayda soo fariista waa rag wada ikhyaar ah oo ka hufan qabyaaladda, iskuna soo xushay daacadnimo, aqoon, khibrad iyo Soomaalinimo. (Oday): waa runteed Xaawo. Raggaan waxaa ka mid ah niman markii rag meel walba xoolaha ka buuxsaday iyagu qare suuqa ku jarjarayey iyo kuwo kaariyoone ku xammaalanayay, haddana Ilaahay baa ka deeqayoo wiilashoodii ayaa u wada shaqeeya. (Nin): waxaa ka daran raggaan iyagoo qabiilooyinkoodu is wada warjeefayaan inay isku duubnaayeen oo ay waardiye iska wada hayeen.

(Nin kale): qoladaan wadaadada ah ha fahmeen arrintaas waxay u qabaan inaan iyaga mooyee cid kaloo khayr lihi jirin.

(Oday caraysan): war nimanyohow waqti badani ma harine, waxaan soo jeedin lahaa in laga tashado sidii nimankaan wadaadada ah la isaga qaban lahaa; waayo waxaan jaahwareer iyo is qabqabsi hor leh ahayn nooma keenin. Waxaa iiga daran qummanahoodaa qoorta ugu jira, oo cid kale waxba uma oga. (Nin): adeer Geelle wax badan baa kaa dambeeyay oo nimankii waanu is afgaranay, haddana is waraysi iyo wadahadal ayaa noo socda ee adiga uunbaa naga maqnaa.

(Oday kale): walaalow Geelle xaggee nimanka lagaa tusay?. Anigu nimankaas abaal weyn baan u hayaa, waxayna qabteen hawl ballaaran oo ay tahay in looga mahadceliyo, waxaana ka mid ah: faafinta diinta, la dagaallanka khuraafaadka iyo bidcada, faafinta cilmiga diinta gaar ahaan xadiiska nabiga (scw), baahinta cilmiga Tajwiidka, hirgalinta xijaabka gabdhaha oo dal iyo dibadba ishaadu ku qabawsanayso, waxbarista dumarka oo aynu awal aad ugu liidan jirnay, hanuuninta dhallinyarada oo annaga xilligayagii ka faani jiray wadaadnimada.

(Nin kale): horta nimankaan qofkii u fiirsada wuu ku wareerayaa; maxaa yeelay hawlahaas odaygu sheegay oo dhan way qabteen. Waxay kaloo ku guulaysteen: a) in ay isku xiraan cilmiga diinta iyo kan adduunyada, b)inay dhisaan mu'assasado waxbarasho oo isugu jira jaamacado, macaahid iyo iskoolo, c) inay qeyb weyn ka qaataan horumarinta dhaqaalaha dalka, d) inay heshiisiiyaan oo xalliyaan mashaakilka bulshada, e) inay u noqdaan qabaa'ilka salaadiin, cuqaal iyo tujaarba oo ay waliba 100% ku guulaysteen. Tan kale jaaliyadaha dibadda iyagaa dawlad hoosaad u ah oo wax walba loola soo noqdaa. Xattaa muslimiintii kalaa ka faa'iidaystay oo diinta kaga dayday.

Waxaa haddaba yaab leh sida ay nimanka waxaasoo guulo ah soo hoyiyay ugu fashilmeen inay iyagu is afgartaan, midoobaan ama ugu yaraan is kaashadaan. Waxaa ka sii yaab badan sida ay hubka isugu qaateen iyadoo madaxyadooda qiime kasta lagu raadinayo, cadawgii dibadda iyo kii guduhuna isugu qaylo-dhaansanayaan. Dhinac kale woxoodu waa quud aan jirin qoryo u guro; waayo shalay bogga www.somalitalk.com wuxuu soo bandhigay diraasad muujinaysa in 13/05/2009 badda Soomaaliya lagu wareejin doono hay'ad Q.M raacsan oo dawladaha ka kirayn

doonta. Waxaa kaloo ka qayliyay dibindaabyada Soomaaliya lagu hayo odayaasha dhaqanka Hawiye oo xeerada salkeeda soo taabtay, ka dib markay booqdeen Kenya oo ay ku tilmaameen inay tahay meesha luggooyada Soomaalida laga maleego.

(Nin kale): aniga waxaa iga la yaab badan sida ay iyagoo awal isku duubnaa boqol kooxood u noqdaan markii arrintu siyaasad noqoto. Bal eeg P/land waxay ku kala fayleen murashaxiintii, S/land-na xisbiyada ayay la kala safteen, reer koonfurkuna hubkayba isu qaateen!. Malaha nimanka Shiikhoodii ayaa siyaasadda ka habaaray!. (Nin kale): waar nimankan ma laha aragti siyaasadeed; sidaa darteed markii arrintu siyaasad gasho ayay beelohooda ama deegaanadooda la kala saftaan.

(Nin): waxay ila tahay in la isla fahmay waxqabadka wadaadadaan iyo ahmiyadda ay ummadda ugu fadhiyaan. Waxaa kaloo la soo bandhigay inay dhinaca siyaasadda ka arradanyihiin oo aysan wax aragti ah ka lahayn, taasna ay keentay inay iska hor iyo dabayimaadaan markay xaggeeda u dhaqaaqaan. Haddaba waxay u baahan yihiin in loo dulqaato, lana baritaaro intay dhinaca siyaasadda ka qaangaarayaan ee aan la niyadjabin.

(Oday kale): waa runtaa, waxaase loo baahan yahay in aysan hambada noo soo doogtay isku layn. (Dhammaan): waa sax, waa run.

(Oday): nimanyohow anigu waxaan fadhiyadaan ka fahmay inay meesha isugu yimaadeen rag xul ah xagga aqoonta iyo xagga waaya-aragnimadaba, isla markaana ragga meesha isugu yimid ay Soomaaliweyn yihiin. Haddaba halkaa waxaa iiga dhalatay fikrad muhiim ah: in raggaan laga wado maqaaxida oo loo sameeyo xarun cilmibaariseed oo ay si gaar ah isugu waraystaan, uguna darsaan danaha ummadda.

(Nin kale): afkaaga caano lagu qabay, waa talo biyo kama dhibcaan ah. (Oday): waar raggu meesha dhaqaale kuma hayee, yaa inoo aasaasaya?. (Nin): adeer anigaa haya xarun ay taal kutub iyo dukuminti farabadan oo muhiim ah, kumbuyuutar iyo Internet-na waa inoo ku jiraa. (Nin kale): waa ok, waliba Xaawo-na ha noo timaado oo xagga shaaha ha noogu kariso. (Nin kale): waxaa ila quman in rag soo diyaarshaan sidii xaruntaas looga faa’iidaysan lahaa iyo qorsheheedii. (Kulli): haye, haye.

Axmed C/samad
alwaqaar@hotmail.com

[1] wadaad saaxiibkay ah ayaa qolo ugu baaqday reernimo hoose, deeto wuxuu ugu jawaabay: waar 42 qabiil oo ay ka mid yihiin Tuuf iyo Quraanyow ayaan xeero gacanta la galiyay, dee iga wallee inaanay reer hebel kaliyi dhuuntaa ii marayne I dhaafa!.

Haasaawe siyaasadeed (Qeybta 6aad)[1]

Axmed C/samad

alwaqaar@hotmail.com

Waxaa muddo ka dib la isugu soo noqday kulamadii taxanaha ahaa ee maqaaxida shaaha, iyadoo muddo la kala maqnaa. Hadalka waxaa bilaabay oday Cabdulle, oo yiri: waqti dheer baynu kala maqnayn, waxyaabo badana intaas way dheceen, wadaadka oo shirkii culimada ka soo qeybgalayna waa inoo yimid, ee bal wixii warbixinno ah hadalka inoo ka bilaaba.

(Xaaji Ibraahin): waa talo fiican, laakiin wadaadka iyo labo ninoo kalaa is barashadii nooga dhimmanaaye, iyada inoo hormariya, Shiikh Ciise-na ha ku hormaro.

(Sh. Ciise): magaca la sheegye waxaan ahay Abas kuul[2], waxaana ku dhashay, Qabri Bayax, takhasuskayguna waa dacwada, khibrad dheeroo 32 sano ahna waan u leeyahay. (Nin): adeer anigu waxaan maqli jirey Habasguul, ee ma kaasaad u jeeddaa mise qolo kale. (Nin kale): adeer is raacsoo Qabri bayax-na noo sheeg halkay dhacdo. (oday kale): ceebeheena waxaa ka mid ah in aynaan dadkeena iyo dalkeena aqoon, waxaase ka daran intii la yaqaanayna si qaldan bay dad badan ugu dhawaaqaan. Magaca saxda ah waa sida Sh. Ciise u yiri ee Habas iyo guul midna ma jiro, Q/bayax-na waa degmo raacsan gobolka Jigjiga ee S/galbeed.

Magacay waa Buulle Axmed. Waxaan ku dhashay Daafeed[3], qabiilkaygu waa: Intii injeedi kiila jirow barbaarre. (Nin): walaal waxaasi waa sheekee qabiilkaaga noo sheeg. (Nin kale): waar waa jifo ka mid ah Shanta caleen'e dadkaaga kala baro.

(Buulle): waxaan bartay cilmiga beeraha, waxaana leeyahay khibrad 26 sano ah. (Oday): wadaadkaa inoo haraye ha ku soo dhawaado.

(wadaadka): magacaygu waa Axmed C/samad, miyiga Galdogob baan ku dhashay, waxaana ahay Xer. (nin kale): xertee ma Timaweynta?. (mid kale): Alla kani miskiinsanaa!, war mayee waa qabiil Xer la dhoho. (mid kale): Xer-tu ma tu direedbaa mise waa mid Daarood?. (nin kale): war innagaa yaab aragnay oo goormaa Xeraha la kala yeeshay?. (mid kale): war ninkaan afkiisaa sheegayoo haybsi kale uma baahnee iska daaya, waa Leelkasee. (Mid kale): oo maxaad kaga garatay afkiisa faradheertaan wada qaylinaysa?. (ku kale): war iska daa waa reer Muduggii dhibtaan noo keenaye!.

(Wadaadka): Nimanyohow ogaada magacaan Mudug dad badan baa isla lahaa, markii dambe inta bar la jaray baa G/guduud loo baxshay, magicii eedaysnaana annagaa na loo ka tagay. (Nin kale) oo maxaad uga dagaallami weydeen?. (ku kale): ma iyagaa diidi karay dawladda markaas reer G/guduud baa haystaye!. (Xaawo): waryaa maxaad saa u leedahay xilligii Maxamed Siyaad baa magacaan (G/guduud) gobolka loo baxshaye?, (Cismaan): Xaawo adigaa isku maragfuray, ninkaad sheegaysid yuu ahaa?. Marreexaan asalkiisii soo Mudug kama soo faalalin?.

(Nin kale): Wadaadka daaya, waa runtiise, nimanka curadyadooda inta madaxa koombooyinka u saaray yiri: nin walba wiilkiisa koombada dul saaran xabbad ha kaga qaado sow idinka ma aha?.

(nin kale): Daya daya!, Cali yare ficila reer Mudug-nimaa qaadaye, war adiga maxaa kaa galay ma awowgey baa Wisil ku dhashay baad ugu gurmanaysaa illaa adigu ciyaal Marka ayaad tahaye?. (Cali yare): Sow idinku ku dhashay iyo u dhashay ma keenin oo meeshii xuduntayadu ku duugnayd (aasnayd) nooma aydnaan diidin?.

(Nin kale): gartu Ilaah bay taqaane ma kala shar yaridin, waxaa la yiri: todobada cadaabood waa kala cawdu billaystaan!. Haddaan idiin fiirsadayna sharka qarsoon reer Muduggaa badan, kan qaawana reer G/guduudka. (Sh. Mukhtaar): illaa lammagoodle hadal looma bilaabo, war nimanyohoow kaftanka naga joojiya, waqtigu waa qaaliye. (dhammaan): haye, sheekh wado.

(wadaadka): shareecada ayaan wax ka barbartay, dacwadana waa ku lug leeyahay, far Soomaaligana mar mar baan wax ku qoraa.

(Oday): horta kulamadaan faa'iidooyin badan baan ka helnay, waxaana ka mid ah barashada dadka iyo dalka, xog iyo talooyin badan oo muhiim ah, in wax badan oo Soomaali isku hayso aysan sal iyo raad midna lahayn, waxyaabana si xal looga gaaro loo baahan yahay in si deggan oo walaalnimo ah looga wadahadlo.

(Oday kacsan): waryaara meeshu ma meel wadaadadaan ummadda kharribay loogu dacaayadeeyaa?, waar naga daaya dadkaan diinta ku qaraabanaya oo dadkana baaba'shay, gaaladana qabqablayaashii uga hoosmaray. (Nin): waar ii banneeya jaajuuska xunkaa, wallaahi inuusan geedo dambe calalinayne. (Nin): waar qabo ninka, adeer meesha waa la wada hadlayaaye dagaal ma jiro. (Kuwo kale oo yimid): waa maxay dagaalku?. (Ninkii): waar waa jaajuus xunoo diinta iyo culimadu ka baxsan weydaye yuu iga fakan. (Kuwii yimid): waar ka bayra ninka la sheegayo. (Oday): adeer shaydaanka iska naara, odaygaan annagaa naqaanoo jaajuus maahee, hadalkaa ka qalloocdaye. (Wadaadkii): waar dhallinyaro bal u suga, ninku ina ka fakan maayee, bal aynu ninka la xaajaysanee. Bal fariisiya ninka xanaaqsan. (Raggii yimid): haye, walaal fariiso ninku inteenaas ina kama fakan karee. (ninkii): waa hawraarsan.

(wadaadka): adeer magacaa?. (Nin kale): Sheekh ninkaan odayga ah waa la yaqaan, waana nin wanaagsan. Markii aynu sheekada bilownayna wuu ina ka maqnaa, oo waxa aynu ka hadlayno ma fahamsanayn ee yaan arrintaa waxba laga soo qaadin. Magiciisuna waa Warsame. (Wadaadka): Warsame adeer soo dhawow dadka meesha fadhiya waa walaalahaa iyo wiilashaadii. Goobtaana in aan ku kala faa'iidaysano ayaan isugu nimid annagoo walaalo is jecel ah ee muran iyo middi middi ku taag ma jiro.

(Odaygii): see baanu u jirin haddii ju' la idiin dhoho xabbaddaaba idinka soo horraysee?. (Wadaadka): mayee adeer sida aad nooga maqanayd ayay raggaan kalena nooga maqanaayeen ee aynu is qancino. (Odaygii): waxba kama qabo.

(Wadaadka): horta annagu marna ma aannaan oran wadaadadu qalad ma leh oo waa ceeb ka saliim, waana qirsanahay inay si toos ah ama si dadban shacabka dilkiisa uga qeybqaateen, inkastoo aan hubno in arrintaa si ula kac ah cadawgu u buunbuuniyay. Tan kale ma diidanin in aan gaalada wadahadal la galnay oo wax kula heshiinay. Haddaba aan su'aal ku weydiiyee dalka annaga iyo qabqablayaal baa isku haynaye miyaanaan ka dhib iyo shar yarayn raggaas, adigoo

dad baabi'inta aad sheegtay tusaale ka dhigaya?. (Odayga): Shaki ma leh inaad ka shar yar tihiin, inta ay dilaan iyo inta aad dishaana wax la isbarbardhigi karo ma aha.

(Wadaadka): dhinaca kale miyaanaan ummadda uga nafci badnayn?. (Odayga): waa la hubaa inaad ka waxtar badan tihiin dhinac walba.

(Wadaadka): Dhinaca heshiiska gaalada horta ma inkirayno, laakiin adeerow Ilaahay baan kugu dhaarshaye ma waxaa siman nimankii gaalada keenay iyo kuwii saaristooda ka shaqeeyay, mise waxaa siman raggii la dagaalamay iyo kuwii u dagaalamay?. (Odaygii): marag Ilaahay inaysan sinnayn. (Nin kale): Sheekh hadda arrintii Xabashida la idin kuma haysto ee African-kaan aad soo daldalaysaan iyo gaalada kalee aad u gacanhaatinaysaan baa la idinku haystaa.

(Wadaadka): horta eeddaa nala la maagaye hawshaan annaga way naga horraysay, haddana in cidi talo naga weydiinayso iyaga iyo kuwo kaloo la keenayo midna ilama aha, waxaana ku qancay fikraddii maanta halkaan odayaashu ka soo jeediyeen oo ahayd inay madaxweyne Shariif iyo wadaadada ka soo horjeeda labadaba dalka ka ilaalinayaan.

(Odaygii): adeer khayr Alle ha ku siiyo, jawaabtaada waan ku qancay ee raalli ka ahaada qadafkii iga dhacay. Nimankii aan is galnayna aniga waa iga cafis, iyagana inay I cafiyaan baan ka codsanayaa. (Raggii kale): adeer cafi iyo masaabax, raallina naga ahaw. (Oday Jaamac): waar Soomaali is faham la'aan bay isku dhammaysay, bal eega khatarta aynu maanta galnay iyo hadda sida raggii isu qanciyeen.

(Oday): waqtigii waxaa maanta ina ka lumiyey buuqii Warsame nagu kacshaye bal inta hartay wadaadku ha nooga waramo waxa uu la soo kulmay iyo siday ugu muuqato.

(Wadaadka): nimanyohow warka meesha yaal fadhigaan laguma soo koobi karee, waxaa ila quman inaan arrimaha qaarkood qoraallo ka diyaariyo, qaarna aynu kulamadeena soo socda ku gorfayno. (dhammaan): haye, haye. (Nin): kuwa aad qoraysid cinwaanadooda wax ma nooga sii sheegi kartaa?.

(Wadaadka): haayoo, waxaa ka mid ah: Shiikhoow waxaan ku weydiiyey, Is caddee iyo yaynu wax u qornaa?.

---

[1] Qoraalkaan waxaan diyaariyey intaanan Xamar tagin, wax yar baanse ka badalay.
[2] Waxaa la yiri: Abas macnihiisu waa ABEES (lab ah), KUUL-na waa indha-kuulan. Haddaba macnaha magucu waa Abeeskii indha-kuulnaa.
[3] Daafeed waa magaalada ku caanka ah Wanlaweyn ee gobolka Sh/hoose.